

Waxa aad u bahan tahay inaad ogaatid ka hor intaanad ka bixin isbitaalka

Qorshaynta goorta aad aadi doonto gurigaaga waxay bilaabanaysa marka lagu dhigo isbitaalka

Si aad u dareento amaan markaad gurigaaga kusoo noqoto, waxaan bilaabayna qorshaynta guri ku noqoshadaada isla marka lagu dhigo isbitaalka.

Si wada jir ah ayaan adiga iyo anagu oo aynu si dhaw ula shaqayn doono degmada aad dagan tahay iyo rugta caafimaadka ee aad ka tirsan tahay iyo qaybta qaabilaada ee isbitaalka. Waxaan qorshaynayna sidii lagaaga caawin laha baahida aad qabto marka aad gurigaaga timaado sidii ugu dhakhso badan.

Sidee ayaay wax u socon doonaan?

Isbitaalka ayaa war galinaya dhinac yada kale marka aad isbitaalka ka bixi doonto iyo xitaa hadii aad ogolaato waxa loo gudbindoona warbixinta sabaabta isbitaalka laguugu dawaynayo iyo baahidaadu inta ay leeg tahay marka aad isbitaalka ka baxdo ee aad gurigaaga timaado. Sidaa awgeed ayaay isku diyaarinta imaatinka gurigaaga ay si dhakhso leh ugu bilaabmaysa.

Aragtidaadu waa mihiim!

Qayb mihiima oo ku saabsan warbixintani waa waxaad adigu u malaynaysid inaad caawimo u baahan tahay. Sidaas awgeed ayaay shaqaalaha isbitaalka ka shaqeeyaa ay ku waydiin doonaan waxaad aragtid inay dhib kugu noqon doonto marka aad guriga dib ugu soo noqoto.

Waxaa la filayaa inaad isbitaalka ka baxdo-----

Xidhiidh daryeel oo toos ah iyo SIP

Waxaa kale oo aad ka heli doontaa xidhiidh daryeel oo toos ah rugtaada caafimaadka(Vårdcentral) ama qaybta qaabilaada oo ka masuul ah xiriirinta iyo qorshaynta sii socodka daryeelkaaga caafimaad mudaada soo socota. Waxa la sameeya inta badan marka aad isbitaalka ka baxdo iyadoo ay goobaha aad xidhiidhka la lahayd sida rugtaada caafimaadku ay kugu yeedhi doonaan kulan SIP (SIP-möte). Halka ayaa lagu samayn doona qorshe shakhsiyeed adiga kuu gaara (SIP) taasi oo aad fursad weyn u leedahay inaad ka qayb qaadato oo wax ka badali karto sida loo habaynayo caawimaada lagu siinayo marka aad guriga timaado.

Goobaha aad xidhiidhk caafimaad oo joogta ah la leedahay

Magaca:

Lambarka telefoonka:

Dib u kulan

Marka ay soo dhawaato wakhtiga aad isbitaalka ka baxayso waxa inta badan la qabsada kulan halkaasi oo adiga goobaha aad xidhiidhka joogtada ee xaga caafimaadka la leedahay iyo gacan hayahaaga xafiiska degmada ay ka qayb galayan

Ujeedadu waa in lagu siiyo fursad aad ku codsato caawimo iyo taageerada aad uga baahan tahay degmada (kommunen) iyo in hadii loo baahdo loo sii diyaariyo kulanka isku habaynta qorshaha shaqsiyeed (SIP). Dib u kulankaasi wuxu ku suurto gali kara kulan fiidyowga la iska arkayo oo lagu wada hadlo, tilifoon lagu wada hadlo ama booqasho shaqsiyeed oo aad ku timaado qaybta isbitaalka.

Kulanka fiidyowga lagu samynayo(möte via videolänk)

Shirka/kulanka lagu sameeyo fiidyowga inta badan waa la isticmaala labadaba marka ay noqoto kulanada isku soo noqoshadda iyo SIP(habaynta qorshaha shaqsiyeed) taasi oo macnaheedu yahay in dadka ka qayb galaya kulanka ay iska arkayan oo iskana maqlayaan shaashadda tv ga iyo kamarad halkii shaqsiyan loo kulmi lahaa.

Qofka bukaan socodka ahi uma baahna aqoon farsamo oo arintan ku saabsan! Waxalaala wixii qalaba iyo sida loo maamulayo shaqaalaha meesha ayaa ku shaqo leh.

Faa'iidooyinka marka lagu shirayo fiidyowga waa in aad ka baxsanaysid safarka taasi oo u fududeynaysa adiga iyo qaraabadaada iyo shaqaalaha ku sugan meel kale.